September 1

2018

2018 Xaalka IslaXisaabtanka Soomaaliya

In kastoo ballamo badan la sameeyay, wax yar ayaa laga qabtay isla xisaabtanka wixi ka dambeeyay warbixinteena hore.

Waddadi musuqa oo aanan laga leexan

Contents

Warbixinta oo Kooban 3
Hordhac 4
Qaabka warbixinta loo ururiyay 4
Musuqmaasuqa Siyaasadda 4
Xorriyadda Siyaasaddeed ee DFS 5
Rididdi Guddomiyaha Baarlamaanka 6
Tilaabooyinka laga qaaday gobollada. 6
La-wareegidda Garsoorka 7
Horumarka dastuurka 8
Inkirmada dastuurka iyo nidaamka doorashada 8
Musuqmaasuqa Wasaaradaha 9
Wasaaradda Amniga Gudaha 9
Booliska iyo NISA 9
Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha 10
Wasaaradda Gaashandigga 10
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha 11
Boobka dhulka dadweeynaha 11
Bixinta Qandaraasyada 11
Bixinta adeegyada 12
Maamulka Gobolka Banaadir 12
Daahfurnaanta 12
Isla Xisaabtanka 13
Waxyaabaha la fili kara 2019 14
Soo jeedin 14

Warbixinta oo Kooban

Doorashadi Maxamed Cabdullahi Farmaajo ee 8da Febraayo 2017 waxey dhiiragelisay marqaati maadaama uu Farmaajo u muuqday musharaxa ugu wanaagsan isla xisaabtanka. Si kastaba ha ahaatee, Madaxweynaha wuxuu u muuqday in uusan dan ka laheyn in uu wax maamulo isagoo awood badan siiyay Raisal Wasaaraha. RW oo rug cadaa ka ahaa ololihii musuqa baahsanaa ee madaxweynihi hore, wuxuu la dagalanka musuqmaasuqa ka dhigay wax aanan ahmiyad u laheyn. Hadalka marki loo eego, isla xisaabtanka waxey aheyd midda udub dhexaadka u ah hadalkiisa. Sidaasi oo ay tahay, wuxuu si baahsan u isticmaalay laaluush si uu u gato mucaaradkiisa siyaasadeed isagoo isticmaalay lacago laga soo leexiyay Maamulka Gobolka Banadir iyo boorsooyin lacag oo laga keenay dawlad Khaliijka ku taalo.

Marki ay laaluush iyo shaqaaleeysiin ay wax ka tari weyday dhammaan dadka dawladda dhaleeceeya, caburis iyo aamusinta mucaaradka ayaa noqday aaladaha cusub. Muqdisho waxa ay qarka u saarneyd in ay burburto dhawr jeer sanadkii 2017 iyo 2018 iyadoo sababtu ay aheyd habdhaqanka RW oo taageero ka helaya Madaxweynaha.

Inti uu RW ku mashquulsanaa caburinta Muqdisho, Madaxweynaha wuxuu diirada saaray wiiqidda nidaamka federaalka ah kadib marki ay dawlad goboleedyada ay diideen in ay xaaladda Khaliijka ka qaataan mawqifka dawladda dhexe ee magac ahaan ahaa dhexdhexaadnimo lakin dhab ahaan ahaa mid dhan u janjeera. Arrintan waxey ku dambeysay in xilka laga qaaday mid kamid ah madaxweynayaasha gobolloda iyo diyaarinta mooshino kalsooni kala noqosho ee maamul goboleedyada kale. Sida muuqata, dhaqdhaqaaqyada DFS waxey yeelatay saameeyn cagsi ku ah ula jeedki laga lahaa: DFS maanta ayay maamul goboleedyada kaga saameeyn yartahay marki loo barbardhigo kahor inta aysan bilaabin awood bursigeeda.

Dhanka dhisidda hay'adaha dawliga, DFS wax kama qaban dhisidda xubnaha dawladnimo ee muhiim u ah sameynta dawladnimada Somalia. Waxaa kamid ah hay'adaha aanan la dhisin Maxkamadda Dastuuriga, taasi oo dhexdhexaadin laheyd DFS iyo dawlad goboleedyada; sidoo kale lama dhisin golaha ladagaalanka musuqmaasuqa, taasi oo awood u lahaan laheyd in ay soo celiso hantidi la boobay; iyo Guddiga Adeegga Garsoorka, kaasi oo sahli lahaa dib u habaynta garsoorka.

Sida muuqata arrinta ahmiyadda koowaad u leh xukuumadda ayaa ah in ay hesho awood aanan lala xisaabtamin. Si taasi loo gaaro, waxey tuureen guddoomiyaha baarlamanka oo ay ku bedesheen mid ay leeyihiin; waxey eryeen xubnaha Maxkamadda Sare oo ay ku bedesheen dad daacad u ah. Saddexda garab ee dawladda ayaa hadda gacanta si buuxa ugu jira Villa Somalia.

Xukuumadda ayaa sidoo kale isku dayaysa in ay awoodeeda ku kordhiso iyada oo u mareysa dib u eegidda dastuurka, si ay dawladda dhexe u hesho awood aad uga badan gobollada. Taasi haddii

ay dhacdo, ismariwaa keeni kara xasilooni darro ku timaada geedi socodka sameynta dawladnimada aya dhici karta.

Madaxweyne Farmaajo looma maleynayo in uu si shakhsi ah uga faa'iiday lacag la lunsaday. Hase ahaatee ballamahiisa ee ladagaalanka musuqmaasuqa weli lama hirgelin. Wuxuu weli leeyahay fursad uu ku sameysan karo dhaxal iffayo haddii uu qaato tilaabooyinka loogu soo jeedinayo xagga isla xisaabtanka.

Hordhac

Warbixintan waxey soo daahday in kabadan afar bilood. Sababta waxey tahay waxaa la qorsheeyay in la daabaco marki ay xukuumadda sanad jirsato. Hase ahaatee, xaaladda Muqdisho ka jirtay iyo xamaasad la'aanta xagga dawladda ee ka jawaabidda su'aalaheena ayaa dheereeyay waqtiga ay nagu qaadatay xaqiijinta warbixinnada aan helnay.

Warbixinta waxey diiradda saareeysaa dawladda federaalka iyo ballamaha ay sameeyeen madaxdeeda ee ku aadan bedelidda habdhaqanka caadada ka dhigay musuqmaasuqa ee dawladihi hore. Si kastaba ha ahaatee, waxaan si dhaqsi ah ku ogaannay in caadeeynta musuqa uu gaaray heer sare marki aan waajahnay mas'uul sare ee dawladda katirsan ee u sheegnay in shaqsi Baraha Bulshada kahadla uu hotel ka sheegayay in uu $70,000 ka qaatay RW, wuxuu inoogu jawaabay, 'Lacagtaas waa gunno'. Sida muuqata, inta uu shaqsiga qof saddexaad lacagta u siinayo arrimo siyaasadeed oo uu naftiisa u isticmaalin, dawladda hadda jirta uma aqoonsano arrinkaas in uu yahay musuqmaasuq.

Waxaan rajeynaynaa in ay warbixintan u noqoto Madaxweyne Farmaajo tii uu ku soo toosi lahaa oo uu wajhadda ku bedelan lahaa. Weli wuxuu leeyahay fursad uu dhaxal wanaagsan uga tagi lahaa.

Qaabka warbixinta loo ururiyay

Warbixintan waxey ku salaysan tahay macluumaad laga helay Aaladda Islaxisaabtanka Soomaaliyeed oo ay marqaati hirgelisay; in kabadan 600 macluumaad oo ay so direen dadweynaha ku dhaqan dhammaan Soomaaliya ayaa soo gaaray aaladdan wixi ka dambeeyay warbixinteena sannadki hore. Waxaa intaasi dheer in kabadan 50 qofood ee macluumaad toos ah marqaati ku siiyay wareeysiyo.

Musuqmaasuqa Siyaasadda

Madaxweyne Maxamed Cabdullahi Farmaajo wuxuu awoodda ku guuleystay kadib ololihii marqaati ee ifinta musuqmaasuqa ay ku kacday xukuumaddi hore, sidaasi darteed wuxuu ka dhigay la dagaalanka musuqmaasuqa arrinta ugu muhiimsan ee musharaxnimadiisa qeexeeysay. Sidoo kale, wuxuu sameeyay ballamaha soo socda:

1. In uu soo afjarayo dhaqanka DFS ee caburinta iyo juujuubidda codbixiyeyaasha iyo ku bixinta lacag si uu u guuleeysto musharax ay dawladda rabto.

2. In uu soo afjari doono dhaqanka ah wiiqidda awoodda baarlamaanka iyo u isticmaaliddiisa in uu noqdo mid wax uun lagu saxiixdo.

3. In uu afjari doono dhaqanka ah in malaayiin doolaar uu ku isticmaalo rididda iyo dhisidda xukuumadaha.

4. In uu la dagaalanka musuqmaasuqa uu ka dhigi doono ahmiyadda koowaad ee dawladdiisa.

Waxaa muhiim ah in la eego wiixi dhacay kadib la wareegidda awoodde ee Madaxweyne Farmaajo si aan u qiimeeyno heerka uu gaarsiisanyahay ujeedooyinka u hirgalay.

Xorriyadda Siyaasaddeed ee DFS

Waxaa 29ka Maarso 2017 la ansixiyay xukuumadda Raisal Wasaare Xassan Cali Kheyre. Xaaladda siyasadeed ee xilligaas jirtay awgeed, RW wuxuu isku dayay in uu iibsado taageero isagoo siiyay qaar kamid ah xildhibaanada saameeynta leh in kabadan $100,000. Lix bilood kadib, iyadoo moshin kalsooni kala noqosho ay suuqa ku jirto, RW wuxuu bedelay xeeladiisa. Qaab-fikirka dawladda ayaa noqday ama ila jir ama iga jir.

Dadka internetka dadka ka caaya ee loo yaqaano trolls oo ay xukuumadda u adeegsan jirtay shaqsiyaad kooban ayaa si ballaaran loogu jeediyay dadka siyaasadda dawladda dhaleeceeya. Ciidanka trolls ka ah ayaa waxeey caan ka dhigeen ereyada Qaran Dumis. Marar kooban ayaa Qaran Dumis Facebook lagu arki karaa 1da Janaayo 2016 ilaa 8da Febraayo 2017 goortaasi oo la doortay Farmaajo.

Isticmaalka ereyadan ayaa cirka isku shareeray wixi ka dambeeyay 17ka Diseembar 2017 marki ay xukuumadda tilaabo ka qaaday siyaasiyiinta ku hawlanaa abaabulka mooshinka kalsooni kala noqoshada xukuumadda. Xeer Ilaaliyaha Guud wuxuu codsaday in xasaanadda lagala noqdo labo kamid ah xildhibaannada mucaaraadka ah isagoo ku eedeeyay in ay dal ajinabi ah lacag ku siiyay in ay qaranka dumiyaan. Sax bay aheyd in xildhibaano qaarkood lacag lagu siiyay in ay saxiixaan mooshinka kalsooni kala noqoshada. Labada dhinac ayaa lacag bixinayay.

Maadaama uu ahaa bartilmaameed fudud oo aanan laheyn xasaanad, xukuumadda waxey dooratay in ay weerarto guriga Cabdiraxmaan Cabdishakuur oo ay ku soo oogto dembiga Qaran Dumis. Siyaasigan wuxuu sidoo kale qeyb ka ahaa abaabulka mooshinka. Weerarka siyaasiga lagu qaaday ayaa ahaa digniin cad ee loogu talo galay dhammaan jileyaasha siyaasadda ee Muqdisho oo loogu caddeynayay in aanan la oggoleyn dhaqdhaqaaq siyaasadeed ee aanan si indo la'aan ah xukuumadda u taageersaneen. Mas'uul sare oo xukuumadda katrisan ayaa marqaati u sheegay in caburinta loola dan lahaa in lagu curyaamiyo dadaaladada mucaaradka ee ku aadanaa is-abaabulidda inta uu baarlamaanka fasaxa ku maqnaa.

Hoteelada waxaa la amray in aysan martigelin kulamada aanan fasax ka heysan wasaaradda ammaanka. Tani ayaa micnaheedu ahaa in kulan walbo ee la oggolaado uu noqdo mid muxaafad ah ama mid dhexdhexaad ah. In kastoo ay tani keentay in ay xoogeeysato awoodda muuqate ee dawladda, xeelada ma guuleeysan sababtoo ah kulamada iyo abaabulka waxaa laga sii waday guryaha gaarka loo leyahay iyo dalka dibadiisa.

Rididdi Guddomiyaha Baarlamaanka

Guddoomiyihii xilligaas ee Aqalka Shacabka, Maxamed Cismaan Jawaari, ayaa aqbalin in xukuumaadda uu ka yeelo in xasaanadda lagala noqdo xildhibaanada lagu eedeeyay Qaran Dumis. Intaas waxaa dheereed in uu diiday in uu saxiixo heshiis uu daacad ugu noqon lahaa Madaxweynaha iyo RW. Tani ayaa isaga ka dhigtay in loo bartilmaameedsado in xilka laga qaado. Bishi Maarso 2018, marki baarlamaanka dib loo furay, RW oo taageero ka haysta Madaxweynaha ayaa abaabulay xildhibaano si loo eryo Jawaari kadibna booskiisa lagu bedelo shaqsi daacad u ah xukuumadda. Sida caadada aheyd, xildhibaanada lacag ayaa lagu siiyay in ay saxiixaan mooshinka kalsooni kala noqoshada aheyd.

Xukuumadda waxey isku dayday in ay muquuniso baarlamaanka, iyadoo ciidanki loogu talo galay ilaalada baarlamaanka ku bedesha ciidan si gooni ah daacad ugu ah RW. Arrintan ayaa keentay in ay ku sigato in Muqdisho ay dagaal sokeeye madaxa la gasho iyadoo ciidan beeleed xukuumadda ku xanaaqsan ay magaalada soo galeen. Hoggaamiyeyaasha sare ee mucaaradka oo aanan dan u arag in dawladnimada ay burburto ayaa ka hortaagnaa in magaaladu ay dagaal hooy u noqoto. In kastoo uu Jawaari ku mahadsanyahay in uu is casilo si uusan u noqon sababta dagaal sokeeye uu u qarxo, haddane marqaati waxey heshay warbixino lagu kalsoonaan karo ee tilmaamaya in xukuumadda ay lacag siisay.

Marki la saaray Jawaari, waxaa lagu bedelay Maxamed Mursal oo ahaa xubin ka tirsanaa xukuumadda. Guddoomiyaha cusub waxaa lagu doortay geedi socod musuqmaasuq ku dheehan oo ay xukuumadda maalgelisay lacagta ku baxday codadka uu iibsaday; maadaama ay hal beel tartameysay, codadka qaar waxey ku kacayeen $10,000.

Ku dhawaad dhammaan xildhibaanada waxaa la siiyay $5000 qofkiiba doorashada kadib iyagoo loogu sheegay in ay tahay mahadcelin. Lacagtaan oo kabadan 1.5 milyan oo doolar ayaa si ballaaran looga warramay warbaahinta Soomaaliyeed. Lama xisaab celin halka ay ka timid lacagta, lakin sida muuqata waxaa laga keenay gisaca lacagta DFS taasi oo aan ku sharxi doonno qeybta ka hadleysa Maamulka Gobolka Banadir.

Tilaabooyinka laga qaaday gobollada.

DFS ee uu hoggaamiyo Madaxweyne Farmaajo waa mid aaminsan in dawladda dhexe ay awood badnaato waxeyna isku dayday in ay daciifiso aswoodda gobollada. Waxey u isticmaashay kheyraadkeeda in ay wiiqdo awoodda gobollada waxeyna maalgelisaa mucaaradka gobollada iyadoo rajeyneysa in ay taageeraan siyaasadaheeda.

Wixi ka dambeeyay sheegashadi DFS ee ah in ay dhexdhexaad ka ahaato Dhibaatada Khaliijka iyo Qadar u dhaxeyay, Imaaraatka wuxuu inkiray DFS isagoo kordhiyay macaamilka uu la leeyahay gobollada. DFS arrintan waxey u aragtay in ay qatar ku tahay, waxeyna doorbiday in ay xilka ka qaado hoggaamiyeyaasha aanan iyada uga dambeyn arrimaha dibedda.

Bishii September 2017, madaxweynaha Galmudud Axmed Ducaale Xaaf ayaa baarlamaan goboleedka xilka ka qaaday. DFS waxey soo abaabushay oo ay si xooggan u maalgelisay xildhibaanada doonayay in ay xilka ka qaadaan Xaaf. Hase ahaatee, inta ay arrintan xoojin laheyd awoodda DFS, waxey keentay in awoodeeda is dhinto. Madaxweyne goboleedyada waxey ku kulmeen Kismaayo Oktoobar 2017 iyagoo dhisay Golaha Iskaashiga Dawlad Goboleedyada (GIDG), iyagoo diiday in ay aqoonsadaan xil ka qaadista Xaaf. DFS waxey ku qasbanaatay in ay u madax raariciso maamul goboleedyada oo ay u aqoonsato Xaaf in uu yahay madaxweynaha Galmudug, in kastoo xilkaa laga qaaday.

Habdhaqanka DFS ayaa si toos ah u keenay awoodda u korortay gobollada; GIDG wuxuu siyaasiyyan u dhigmaa DFS. Dadaalada loo galay yareenta awoodda maamul goboleedyada wuxuu keenay in ay yaraato awoodda dawladda dhexe. Sidoo kale, faragelinta DFS ee doorashooyinka maamul goboleedyada waxaa laga yaabaa in uu wiiqo dimuqraadiyeenta heer gobol; ugu yaraan hal dawlad goboleed ayaa ka fekiraya in uu doorasho qaban inta uu Farmaajo madaxweyne yahay.

La-wareegidda Garsoorka

Kaddib marki ay xoojiyeen awoodda ay ku lahaayeen Baarlamaanka, garsoorka ayaa noqday garabka u dambeeyay ee u haray in ay la wareegto xukuumadda bishi May 2018 marki uu Madaxweyne Farmaajo xilka ka qaaday Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo uu ku bedelay shaqsi aanan khibrad Garsoorenimo laheyn. Madaxweynaha wuxuu sidoo kale eryay dhammaan xubnaha Maxkamadda sare wuxuuna ku bedelay dad kale. Marki la eego La-tashi la'aanta isbedelka, qaabki uu u dhacay iyo xilliga uu dhacay waxaa muuqata in Madaxweynaha uu tirtirayo caddaaladda iyo dawladnimada si uu naftiisa kaga badbaadiyo in lala xisaabtamo ama dembi lagu soo oogo.

In kastoo uu Garsoorka hadda yahay garabka aad uga fog dastuurka ee dawladnimada, isagoo weli la' hay'ado badan ee u baahan in la dhsio; dib u habayn run ah waa in ay ka bilaabataa dhammeystirka hay'adaha garsoorka. Madaxweynaha hadduu rabo in uu eryo ama uu magacaabo madaxa Maxkamadda Sare waxaa laga rabaa in uu la tashado Guddiga Adeegga Garsoorka (GAG) sida ku cad Qodobka 90(j) ee Dastuurka Kumeelgaarka Soomaaliya. Hadda GAG ma dhisna, sidaasi darteed isbedel lama sameeyn karo maadaama uu GAG dhisneyn. GAG waa weeyso qaadka salaadda ka horeeya.

Si kastaba ha ahaatee, GAG lama dhiso karo sababtoo ah dadka xubin ka noqonaya waxaa kamid ah Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga iyo Guddomiyaha Guddiga Xuquuqul Insaanka. Maadaama aysan labadan hay'adood hadda jirin, GAG lama dhiso karo. Taasi oo micnaheedu

yahay in aanan la eryi karin ama la magacaabi karin garsooreyaal. Xukuumadda waa in ay ahmiyadda koowaad siisaa dhisidda hay'adaha oo aysan hormarin siyaasadda.

Horumarka dastuurka

Madaxweyne Farmaajo wuxuu ballan qaaday in uu dedejin doono dib u eegidda dastuurka; hase ahaatee, maadaama uu dastuurka hadda jiro aheyn mid la hirgeliyay, dib u eegis walba waxey noqon doontaa mid aanan la hirgelin. Iyadoo waqtiga uu ka soo dhammaanayo, dhisidda hay'adaha dawliga ma ahan wax ay ahmiyadda siisay xukuumadda hadda jirta.

In kastoo in badan hay'adaha uu dastuurka amray in la dhiso aanan weli la dhisin, waxaan halkan ku xuseeynaa kuwa quseeya isla xisaabtanka ee aanan weli la dhisin. Waxaa kamid ah:

1. Maxkamadda Dastuuriga. Maxkamadda waxey ahmiyad u leedahay ka doodidda shuruucda dawladda ay sameyso iyo xalinta khilaafaadka u dhaxeeya DFS iyo gobollada.

2. Guddiga Adegga Garsoorka (GAG) oo la'aantiisa garsoore la eryi karin ama la magacaabi karin. Guddigan la'aantiis ma dhismi karaan qaar kale oo kamid ah hay'adaha dawladda.

3. Guddiga Xuquul Insaanka. Waa in la dhisaa inta aanan la dhisin GAG maadaama guddoomiyaha guddigan uu kamid yahay GAG.

4. Guddiga Ladagaalanka Musuqmaasuqa. Guddigan wuxuu leeyahay awoodda ah in uu baaro iyo in uu la wareego hantida la dhacay. In aanan la dhisin ayaa ka dembi yar in la dhiso isago aanan laheyn awooddiisa ku xusan dastuurka, sida ay rabaan in ay sameeyaan qaar kamid ah madaxda hadda xilka haya.

5. Xafiiska Gardoonka. Gardoonka waxaa la dhisi karaa kaddib marki ay soo jeediso arrintaas GAG. Xafiiskan wuxuu ahmiyad u leeyahay xoojinta awoodda dadweynaha iyo sameynta meel ay ku soo sheegaan tacaddiyada ka soo gaara dawladda.

Inkirmada dastuurka iyo nidaamka doorashada

Sidka ku cad Qodobka 59(2) ee Dastuurka Kumeelgaarka ee Soomaaliya, xubnaha aqalka shacabka ee baarlamaanka ee lumiya xubinnamadooda waxaa beddelaya shaqsigi ku xigay marki doorashada la qabtay. In kastoo go'aan siyaasadeed laga gaaray doorashooyinka loo qabanayay kuraasta banaan, saameeyn kuma lahan dastuurka oo ah sharciga dalka. Dhammaan doorashooyinki la qabtay inta uu Madaxweyne Farmaajo xilka hayay waa sharci darro.

Sidoo kale bixinta laaluushka caadi baa laga yeelay dhammaan doorashooyinki loo qabtay kuraasta banaaneed.

Musuqmaasuqa Wasaaradaha

Warbixinada musuqmaasuqa ee ka yimaada wasaaradaha DFS ayaa inoo soo gaarayay si aanan ka yareyn sidi ku xusneyd warbixinteena hore, taasi oo tusaale u ah in aysan wax iska bedelin habdhanqanka xukuumadda.

Wasaaradda Amniga Gudaha



Wasaaraddan waxaa hoos yimaada Booliska Soomaaliyeed, Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha, iyo hay'adda nabadsugiddda ee loo yaqaano NISA. Hay'adahan ayaa ah kuwa loogu cabasho badan yahay. Sababta ayaa ah xiriirka tooska ah ay dadweynaha kala leeyihiin goobaha baarista ee Muqdisho. Waxaan helnay 365 warbixin ee ku saabsan musuqmaasuq la xiriira oo wasaaraddan ku saabsan.

Sidoo kale, wasaaraddan ayaa aheyd midda ugu xirfad xun xagga imaanshiyaha shaqada. Wasiirka ku dhowaad saddex bilood ayuu shaqada ka maqnaa lix bilood gudaheed sanadki 2017.

Booliska iyo NISA

Booliska iyo NISA ayaa checkpoints ku leh caasimadda dhexdeeda; waxaa loo isticmaalaa in dadweeynaha lacago looga qaado qaasatan kuwa kaxeeya gaadiidka dadweynaha iyo kuwa xamuulka. Marqaati waxey aragtay hooyo uur leh oo labo canug wadata oo loo diidayo in ay gaarigeeda la marto Isgoyska Marinada ee degmada Cabdulcasiis haddii aysan iska bixin $50 oo ay siiso ciidanka NISA ee goobta ku sugan.

Dulmiga checkpoint yada kuma koobna dadweeynaha; qaar kamid ah warbixinada aan helnay ayaa sheegaya in askarta ay $1 weeydiistaan dadka aqoonsiga dawladda wata ee aanan hayn xilal waaweyn; kuwa diida waxaa loo diidaa in waddada ay maraan iyagoo loo sheegayo in madaxda uun loo oggolyahay in ay waddada maraan.

Sidoo kale Xarunta Dembi-baarista ayaa ku lug leh lacag ka ridashada dadweeynaha. Ashqaasta doonaya in ay sameystaan baasaboorka ayaa la daahiyaa haddii aysan $10 siinin askarta ka shaqeeya baaritaanka dadka baasaboorka sameeysanaya. Dadka qaar ayaa isticmaala mukhalasiin iyagoo aanan xitaa aadin xarunta dembi-baarista si faraha looga qaado. Waxey helayaan

waraaqadda anshax wanaagga iyaga oo aanan faraha laga qaadin; dad kale ayaa farahooda galka la geliyaa.

Musuqmaasuqa ka jirta xarunta dembi baarista waa mid aanan qarsooneen; iskuma dayaan in ay qariyaan lacagaha ay qaataan. Arrintan waxey wiiqeeysaa kalsoonida dadweeynaha ee dawladda; taasi waxaa u dheer in ay amniga qatar ku tahay.

Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha

Waaxda ayaa lacagaha qaar ay qaado marki ay baasaboor soo saareeyso bixiso waraaqadaha lacag qabashada oo aanan la siin qofki lacagta bixiyay, taasi oo micnahu yahay in aysan jirin isla xisaabtan ku aadan lacagaha ay qaado, iyo in lacagaha gaara bankiga dhexe ay ka yaryihiin inta ashqaasta ay bixiyaan. Faa'iidooyinka laga helo mashruucaan ayaa waxaa qeeybsada madaxda sare ee ka tirsan waaxda.

Sidoo kale, dadka baasaboorka doonaya ayaa la siiyaa fursad ah in ay ku helaan baasaboorkooda 24-72 saacadood haddii ay bixiyaan $50 oo laaluush ah. Maadaama uu daabacidda baasaboorka uu maro xafiisyo iyo nidaamyo badan, daabacidda degdegga ah waxaa laga ogyahay heer walbo oo ka tirsan waaxda; lacagtane sidaasi ayaa loo qeeybsadaa.

Wasaaradda Gaashandigga



XDS waxey fadhiyaan checkpoint ya ku yaala Muqdisho iyo daafaheeda, iyadoo ciidamada waddooyinka taagan ay weli ka faa'iidaan canshuuraha sharci darrida ah iyo baadda dadweynaha wadooyinka mara. Ciidamada ayaa sidoo kale weli suuq-geeya hubkooda, rasaastooda iyo raashinkooda.

Bishi April 2018, kaddib marki ciidamada Imaaraatka ee u joogay tababarka ay dalka ka baxeen, in ka badan 700 AK-47 ayaa suuqa la geeyay. Wareeysiyo aan la yeelanay ciidanki joogay Xerada Tababarka Jeneral Gordon halkaasi oo ay bililiqada ka dhacday ayaa muujinaya in hubka intiisa badan la xaday kaddib marki ciidamada dawladda ay la wareegeen xerada oo ay ka guuleysteen ciidankii gadoodka ahaa. Iyadoo gadoodka laga dhiganayo qiil ayaa saraakiil katirsan XDS hub kala baxay bakhaarka hubka.

Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha

Wasaaradda ganacsiga iyo warshadaha waxey ku shaqo leedahay shati bixinta sharikadaha ka shaqeeya Soomaalia. Shatiga waa hal hal sano, lacagtuna waxey aheyd $300, lakin wasiir Maxamed Cabdi Xayir Maareeye isbedelo ayuu sameeyay. Wuxuu siiyay Beder Printing House in ay daabacdo shatiyada. Dawladda weli waxey heshaa $300 oo risiit leh; hase ahaatee, Beder ayaa waxeey qaadaa $100 oo dheeri ah haddi uu yahay shati cusub iyo $50 hadduu yahay shati cusbooneeysiin. Sababta Beder loo marayo iyada oo ay wasaaraddu wax daabici karto ayaa ah $100ka ee dheeriga ah ayaa ah nidaam wasiirka wax loogu celinayo.

Boobka dhulka dadweeynaha

Madaxweyne Farmaajo wuxuu ka run sheegay in uu ladaggaalamayo boobka dhulka danta guud; majirto caddeeyn ah in uu madaxweynaha ansixiyay dhul la bixiyay ilaa 1da September 2018. Hase ahaatee, Maamulka Gobolka banadir xilligi Taabid Maxamed Cabdi ayay bixisay dhul oo ay siisay sharikadda ECCO, oo ah sharikad qashinka qaadda, iyadoo aanan la raacin waddadi saxda aheyd ee sharciga. Dawladda waxey daabacday waraaqado muujinaya in guddoomiyihii hore ee Gobolka Banadir, Yusuf Xuseen Jimcaale uu ahaa shaqsiga amray bixinta dhulkaas. Iyadoo saas ay tahay, caddeymaha waxey farta ku fiiqayaan in Guddoomiye Taabid iyo kooxdiisa ay ku shaqo lahaayeen bixinta sharci darrida aheyd.

Bixinta Qandaraasyada

Bixinta qandaraasyada ee la siiyo dadka saaxiibada la ah dadka xilalka haya waa dhaqan aanan is bedelin. Qandaraasyada laguma bixiyo iyadoo la raacayo nidaamka saxda ah; haddii la raaco nidaamka waxaa dhacda in ay siiyaan sharikado hore loo doortay. Sharikada ama waxey bixisaa laaluush oo ay siisaa dadka bixinayo qandaraaska ama waxaa iska leh mas'uuliyiin dawladda ka tirsan.

Qandaraasyada qaar waxaa u tartama sharikado ay leeyihiin hal koox ama qof si ay u kordhiyaan fursadahooda; mararka qaarkood waxaa tartama sharikado hal dad wada leeyahay taasi oo xaqiijineysa in ay helaan qandaraaska wax walba haddii uu dhaco. Maadaama uusan jirin daahfurnaan ku aadan geedi socodkan iyo dadka tartamaya, aad ayay u adagtahay in dadkan lala xisaabtamo.

In kastoo ay dawladda iclaamisay in ay burisay heshiisyo ay la laheyd sharikado badan oo qandaraasyada ka qaadan jiray xukuumaddii hore, si hoose ayay u sii waday la-shaqeeynta sharikadihii hore. Sharikado la ogyahay in ay lacag u celiyaan saraakiisha dawladda ayaa weli qandaraasyo ka haysta xukuumadda.

Bixinta adeegyada

Kuwa haysta mashaariicda ayaa lacago siin jiray dad ka shaqeeya xafiiska hantidhowraha guud iyo xafiiska xisaabiyaha guud si loo aqablo foojarada lacag bixinta. Lacagahooda ayaa la siiyaa haddii ay u qabtaan shaqada sida laga rabay iyo haddii kaleba.

Tani waxaa dheereed xafiisyada qandaraasyada bixiya oo lacag-celin heli jiray iyagoo isticmaalaya sicir-bararinta qandaraasyada. Tusaale ahaan, dad ku lug lahaa bixinta mashaariicda MGB sida kuwa la siiyay sharikadda Kulmiye oo heshay mashaariic malaayiin doolar ku baxday, ayaa waxey sheegeen in Kulmiye ay kordhin jirtay lacagaha ku baxa shaqada si inta korortay ay ugu celiso madaxda gobolka.

Maamulka Gobolka Banaadir

MGB ayaa weli waxaa loo isticmaalaa sanduuq lacag lagala baxo oo aanan isla xisaabtan laheyn, sida xukuumaddi hore ay samey jirtay. Si ay u kororto lacagaha xisaab la'aanta ah ee lagala baxo MGB ayaa la rabaa in Gobolka loo kordhiyo saamiga uu ka helo dekeddaa Muqdisho. Kaddib isku dhici maayarki hore Taabid iyo RW dhammadki 2017, video lageliyay Facebook oo ay ka dambeeyeen sida muuqata RW ama saaxiibadiis, ayaa lagu falanqeeyay maaliyadda MGB iyadoo lagu eedeeyay Taabid in uu lacagihi xaday. Waxeey qiyaaseen in MGB bishi uu helo $2,305,870 isagoo qarash gareeya $811,750, taasi oo micnaheeda ah in ay u soo harta $1,494,120 bil walba oo ah $11,952,960 sideedi bilood oo uu Taabid xilligaas xilka hayay. Lakin $186,000 ayaa ku hartay akoonada MGB dhammaadki 2017; ku dhawaad 12 milyan ayaa la xaday. Tani waa mid u dhaw warbixinada aan ka helnay bankiga, sidaasi darteed waxaa inoo cad in eedeeymaha ay guud ahaan ahaayeen kuwoo saxan. Sidoo kale, marqaati waxey haysataa warbixino lagu kalsoonaan karo oo ay ka heshay dad ku lug lahaa mashruuca xatooyada MGB in lacagihi lala qeeybsaday RW si uu isaga difaaco dagaaladi siyaasadeed ee ku furnaa 2017ka.

Lacagaha qaar ee laga qaato MGB ayaa loo isticmaalaa in lagu joogteeyo taageeridda ay xukuumaddu ku leedahay baarlamaanka. Ku dhowaad 80 xildhibaan ayaa bil walba la siiyaa $3000-$5000 oo aanan aheyn mushaar. Lacagtan ayaa noqoneysa ugu yaraan $240,000 bil walba.

Sababtaan ayaa ah sababta ay DFS u diidan tahay in MGB uu faraheeda ka baxo; xukuumaddan iyo kuwi hore waxey u arkaan meel ay lacag aanan xisaab laheyn ka cuni karaan iyadoo ay iska fogeey karaan sumcad darrida iyo xatooyada halkaas ka dhaca. Hase ahaatee, DFS ayaa toos u maamusha MGB, waxeyna mas'uul ka tahay habdhaqanka MGB iyo dadka hoggaamiya.

Daahfurnaanta

Iyadoo ka turjumeysa waaqiciga guud ee daahfurnaan la'aanta, warbixinada billaha ahaa ee ku saabsanaa maaliyadda oo ay DFS soo saari jirtay ayaa la joojiyay laba bil marki ay xilka haysay

xukuumadda cusub. Dukumintigi u dambeeyay oo ay daabacaan wuxuu ahaa bishi June 2017. Sidoo kale, bogga lagu qori lahaa lacagaha soo gala dawladda waxba laguma qorin abid.

RW wuxuu ballanqaaday in xubnaha xukuumadda ay soo bandhigi doonaan hantidooda marki ay xil qabtaan. Ballantaas lama oofin.

Marqaati waxey soo daabici doontaa warbixin saddex-bille ah oo ku saabsan daahfurnaanta qeybaha kala duwan ee hay'adaha DFS, iyadoo la qiimeeynayo warbixinada ay soo bandhigaan oo ku saabsan qandaraasyada dawladda, dadka qanadarasyada la siiyo, lacagaha soo gala iyo kuwa ka baxa, u jawaabidda su'aalaha, haddi ay wax soo bandigaan iyagoo la weeydiin iyo in kale, iyo waqtiga ay ku qaadato in ay soo jawaabaan.

Isla Xisaabtanka

Majirto hanti maguurto ah oo ay bixisay xukuumaddi hore oo ay dawladdan dib ula soo wareegtay in kastoo uu Guddomiya banadir yiri waa lala soo wareegi doonaa. Sidoo kale, majirto cid loo xiray musuqmaasuq uu sameeyay xilligii dawladdii hore; tani ayaa aheyd go'aan ulakac ah oo ay gaareen hoggaanka dawladdan.

Xubno xilal yaryar ka hayay booliska iyo dekedda ayaa la xirxiray bishi Luulyo iyo Agoosto 2018 kaddib marki ay Marqaati wargelisay dawladda in ay warbixinteeda soo saari rabto. Waxaan aaminsannahay in tilaabo walba oo loo qaado isla xisaabtanka ay mudantahay soo dhaweyn lakin dawladda waxey ku guul dareeysatay inta ugu yar ee lagu xaqiijin lahaa in ballamaha Madaxweynaha ay rumoobaan.

Madaxi hore ee canshuuraha qaadka ayaa ka dhistay guryo apartment ah ee ku kacay malaayiin doolar hotel Makka Mukarama gadaashiis isagoo mushaar u qaadanayay $1.200.Tani waxey dhacaday Madaxweyne Farmaajo oo xilka haya; sarkalkan weli waa xor mana jirto baaritaan ku socda inta laga daabacay warbixintan.

Qiimeeynteynu waxey tahay in Madaxweynaha uusan si shakshi ahaan ah uga faa'iidin musuqmaasuq maaliyadeed. Hase ahaatee, wuxuu hoggaamiye ka ahaa musuqmaasuq ballaaran ee dhanka siyaasadda ah, isla xisaabtan la'aan, iyo hoggaamin xumo. Iyadoo madaxweynaha uusan fulin wax badan oo kamid ah ballamihiisa dhanka ladagaalanka musuqmaasuqa ah, waxaan ugu yeereeynaa in uu hadda qaado tilaabooyin si uusan xilka u dhamaan isagoo sumcad darran sida hoggaamiyeyaashi xukuumaddii hore.

Marqaati waxey daabici doontaa warbixin ku saabsan isla xisaabtanka oo saddex-bille ah kaasi oo eegi doona wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawliga ah si uu u qiimeeyo heerka ay ugu nugulyihiin musuqmaasuqa iyo aaladaha ay leeyihiin ee kahortagi kara musuqa.

Waxyaabaha la fili kara 2019

Iyadoo doorashooyin dhawr ah ay ka dhici doonaan maamul goboleedyada 2018 iyo 2019, DFS waxeey u badan tahay in ay sii waddo taageeridda iyo lacag-siinta dadka ay is leedahay taageero ayay kuu yihiin. Taariikhda haddii la eego, xubnaha ay dawladda taageerto haddii ay guuleeystaan uma badna in ay raacaan siyaasadda DFS. Iyadoo saas ay tahay, DFS waxey haddaa taageero siisaa dhawr musharax gobol walba si ay u badiso fursadda ah in uu soo baxo qof ay lacag siisay si ay u ciqaabto madaxda gobollada ee diiday in iyada ay ka dambeeyaan. Tani micnaheedu ayaa ah in dhisidda hay'adaha dawliga ah ay ahmiyad u yeelan doonin xukuumadda maadaama ay ku mashquulsanaan doonto doorashooyinka gobollada iyo kan DF oo aanan aad u fogeyn.

Sidoo kale, dib u eegidda dastuurka ee la filayo in uu dhammaado 2019ka ama kahor ayaa keeni doona hakad gala shaqada caadiga ah ee dawladda maadaama ay DFS la aaminsanyahay in ay dooneeyso in dastuurka lagu xoojiyo arrimaha ay iyadu aaminsantahay gaar ahaan xoojinta awoodda dawladda dhexe iyo yaraynta awoodda gobollada. Tani ayaa keeni doonta in gobollada ay diidaan dib u eegidda dastuurka oo keeni kara in qalalaase xagga dastuurka uu yimaado.

Soo jeedin

Madaxweyne Farmaajo wuxuu weli badbaadi karaa dhaxalkiisa haddii uu qaado tilaabooyin adag ee la dagaalanka musuqmaasuqa iyo taageero isla xisaabtanka. Waxaa kamid ah:

- In uu dhammeystiraa hay'adaha dastuurka uu amray ee la xiriira isla xisabtanka gaar ahaan GAG, Xafiiska Gardoonka iyo guddiga la dagaalanka musuqmaasuqa;
- In dawladda ay daahfurnaanta ka run sheegto oo ay soo bandhigto lacagaha soo gala iyo kuwa baxa;
- Doorashada 2020/1 waa in ay ahaadaan kuwoo hal qof iyo hal cod ah sidii lagu ballamay;
- Dib u eegidda dastuurka waa in uu si cad u kala saaraa awoodaha madaxweynaha iyo kan RW;
- Ashqaasta musuqmaasuqa lagu sheegay waa in la xiraa oo sharciga la horgeeyaa;
- Soo bandhigidda hantida waa in ay ahaato wax waajib ah;
- Nidaamka isla xisaabtanka ee DFS waa in laga hirgeliyaa MGB sababtoo ah Banaadir waa boog weeyn ee lacagaha laga xado;
- Saaxiibada Soomaaliya ee caalamiga ah waa in ay ku cadaadiyaan dawladda in ay hirgeliso soo jeedimaha halkan ku xusan si ay u badbaadiyaan dadaalada kaga baxay dawlad dhisidda Soomaaliya.